healthwatch Camden

Nolosha ‘Kala Xirnaanshaha’

Baaritaanka saameynta safmareenka

Oktoobar 2020

Horudhac

Noolaanshaha iyadoo uu jiro safmareen waa mahadho cusub oo walaac ku dhalin karto dad badan.

Gudaha Maarso 2020, waddanku wuxuu galay ‘Kala Xirnaansho’. Adeegyadu waxay ka wada xirmeen dadka dhammaan marka laga reebo arrimaha ugu degdega badan iyo dadaallada xooggan ee looga jawaab-celinayo dhibaatada Covid-19. Degganeyaashu waxaa lagu xaddiday guryahooda waxayna keentay in si weyn loogu wareego onlayn ka helitaanka shaqada, waxbarashada, iyo daryeelka. Covid-19 wuxuu sidoo kale caqabad aan horay loo arag ku noqday xirfadleyaasha ku jira safka hore, maareeyayaasha, iyo siyaasad dejiyeyaasha.

Waxaan rabnay inaan ka maqalno dadka deegaanka wax ku saabsan mahadhadooda safmareenka ee Covid-19 iyo nolosha ‘Kala Xirnaanshaha’.

Si aan jawaabo u helno, waxaan qaadanay geedi-socod laba qaybood ah si aan aragti uga soo uruurinno dadka ku nool, ka shaqeeya ama ku isticmaalaya adeegyada gudaha Camden:

- Xog-ururin lagu sameeyay onlaynka iyo telefoonka – ayaa socotay laga bilaabo 22-da Abriil illaa 31-ka Luulyo.

- Wareysiyo toddobaadle ah oo qoto-dheer oo 6 todobaad xiriir ah socday si 8 deggane looga soo ururiyo sheekooyin shaqsiyeed oo faahfaahsan oo ku saabsan nolosha kala xirnaanshaha iyo sida ay ula tacaalayaan.

Waxaan xiiseynaynay sida dadku u helayaan macluumaad haga oo ka caawiyo inay si fiican u noolaadaan. Waxaan sidoo kale xiiseynaynay mahadhooyinka helitaanka adeegyada caafimaadka iyo daryeelka inta lagu jiro xaaladaha cusub iyo sida caafimaadka dadka iyo fayaqabkooda loo saameeyay.

Ujeeddooyinka Mashruuca:

- In caddeynta mahadhooyinka dadka muddada uu socda Covid-19 lagu biiriyo tayada caafimaadka iyo adeegyada daryeelka iyo wax-ku-oolnimada macluumaadka / taageerada.
- Aqoonsiga daldaloolada taageerada si gacan looga geysto u diyaargarowga soo noqodka suurtagalka ah ee Covid-19 ee mustaqbalka ama dhibaatooyinka caafimaad ee kale.
- Bixinta tilmaamo loogu talagalay dadka si ay cod ugu yeeshaan wax ku saabsan saamaynta Covid-19 ku leeyahay noloshooda.

Warbixintii ugu dambeysay, ‘Nolosha Kala Xirnaanshaha’ waxay qoraysaa mahadhada iyo aragtida 1,590 ee dadka deggan Camden ee ku saabsan nolosha intii lagu jiray marxaladaha hore ee Covid-19.

Waxa aan ogaanay

Oggaanshaha macluumaadka ku saabsan Covid-19:

1. Dhammaan kooxaha waxay si aad ah ugu tiirsanaayeen telefishanka (iyadoon loo eegin da'da, qawmiyadda ama naafanimada). Kaliya tiro yar ayaa sheegeen inay macluumaad ka heleen qareen, ururada samafalka ama kooxaha diimeed. Waxaa jirtay baahi aan la daboolin oo loo qabay macluumaad ku qoran qaabab la heli karay (tus. Luuqadaha, BSL, Daabacaada Ballaaran, Akriska Fudud).

2. Inkastoo ay jireen caqabado la soo sheegay oo ka reebitaan dijitaal ah, u adeegsiga si isku mid ah ee kooxaha WhatsApp-ka ee dhalinyarada iyo waayeelka ayaa caqabado ku noqotay fikradihii hore ee ku saabsanaa iska caabinta dadka waayeelka ah ku wada xiriirka tiknoolajiyada.

3. Dad badan ayaa soo sheegay inay heleen macluumaad ku saabsan Covid-19 oo indhadaraandar leh oo isburinaya. Dadka qaba xaaladaha caafimaad ee muddada dheer ama naafada ah waxay u badan tahay inay soo sheegaan helitaanka macluumaad ay adag tahay in la fahmo.

Isbedelada ku yimid mahadhada adeegyada caafimaadka iyo daryeelka:

4. Faa'iidooyinka adeegyada onlaynka ah ee caafimaadka waxaa aqbalay dadka oo idil (guud ahaan qowmiyadaha iyo da' kooxeedyada). Si kastaba ha noqotee, qaar ayaa soo sheegay qanacsanaan la'aan daran, oo ay ku jiraan kuwa baahiyaha adag qaba iyo xaaladaha caafimaadka maskaxeed.

5. Dad badan oo ballamo joogto ah ama muddo dheer la sugayay la lahaayeen bixiyeyaasha NHS ayaa bilowgii kala xirnaanshaha la baajiyay. Dad ayaa soo sheegeen wadaxiriir la'aan soo foodsaartay taasoo ka dhigtay inay dareemaan in la ilaaway. Dadku waxay jeclaan lahaayeen wicitaan telefoon ama ballamo onlayn ah tallaabo kumeelgaar ah ahaan.

6. Dadku waxay daahiyeen helitaanka daryeelka ay u baahan yihiin sababo badan awgood. Kuwa aan isticmaalin adeegga caafimaad ama daryeel, shantii qofba mid ayaa inoo sheegay inay u baahnaayeen adeeg balse ay dareemeen in baahiyahoodu dib dhigi karaan inta lagu jiro dhibaatada, oo 13% ayaa doorteen in aysan helin daryeel sababo la xiriira cabsi ay ka qabaan inuu ku dhaco Covid-19.

Walaacyada inta lagu gudajiray 'kala xirnaanshaha':

7. Heerarka walaac ee Covid-19 ayaa aad ugu sarreeyay dhammaan dadka deggan Camden. Si kastaba ha noqotee, jawaabceliyeyaasha Aasiyaanka[1] ah ayaa aad uga **walaacsanaa inuu ku**

[1] Aasiyaan / Aasiyaanka Ingiriiska / Aasiyaanka Koonfur-bari

dhaco fayraska (67%), oo jawaabceliyeyaasha Madow[2] ayaa waxoogaa walaacsanaa (57%), marka la barbardhigo dhigooda Caddaanka ah (50%).

8. Jawaabceliyeyaasha madow ayaa si aad ah **uga walaacsanaa sugnaanta shaqada** (33%) marka la barbardhigo Caddaanka (22%), Aasiyaanka (20%) iyo jawaabceliyaasha kale (24%).

9. Kuwa ka yar 65 jirka waxay sheegeen inay jiraan heerar sare oo walaac kasta oo ku saabsna Covid-19 marka laga reebo qaadista fayraska, marka la barbardhigo kuwa 65 jirka ah iyo ka weyn.

10. Dadka naafada ah waxay u badnaayeen inay soo sheegaan **walaac ku saabsan cidlo ahaansho iyo go'doomid** (54%) marka loo eego dadweynaha guud (31%).

Saamaynta caafimaadka iyo fayaqabka:

11. Waxaa jira cadeymo xooggan oo muujinaya saameynta taban ee weyn ee dhibaatada Covid-19 iyo kala xirnaanshaha u geysteen fayaqabka guud ee dadka ku nool Camden. Boqolkiiba lixdan iyo sideetan oo dadka ah ayaa soo sheegay inuu hoos u dhac ku yimid caafimaadka maskaxeed. Siddeetan iyo siddeed boqolkiiba 25 ilaa 34 sanno jirrada waxay soo sheegeen saameyn xun oo soo gaartay caafimaadka maskaxeed.

12. Hoos u dhaca caafimaadka maskaxeed waxaa soo sheegay kuwa la noolaa arrimaha caafimaadka maskaxeed ee horey u jirey kahor dillaaca Covid-19 iyo kuwa aan lahayn taariikh dhibaatooyinka caafimaadka maskaxeed ah labaduba.

13. Isticmaalka kordhay ee goobaha cagaaran ee furan, jimicsiga, dhimista safarada iyo joogitaanka deegaanka ayaa dhamaantood lagu sheegay inay yihiin saameyn togan. Si kastaba ha noqotee, ku shaqeynta guriga marka la xanaaneynayo carruurta da' dugsiyeedka gaartay ayaa sabab weyn u ahayd diiqada waalidiinta.

Ka gudbida 'kala xirinaanshaha':

14. Tobankiiba afar ayaa dareemay in kala xirnaanshaha si dhakhso leh u dabcayay ama inuu kicin doono koror labaad. Dad badan ayaa soo sheegay inaysan ku kalsooneyn ku noqoshada shaqada, dugsiga iyo hawlaha kale, kuwaasoo qaarkood doorteen inay sii wadaan is-go'doominta.

15. Mid ka mid ah afartii jawaabceliyeyaal ee ra'yi ururinta waxay doonayeen inay arkaan kala xirnaanshaha in la qaado.

16. Boqoley badan oo jawaabceliyeyaasha Madowga ah waxay rajeynayeen dabcinta kala xirnaanshaha (53%) marka la barbardhigo kooxaha kale. Taas beddelkeeda, kaliya 15% jawaabceliyeyaasha Aasiyaanka ah ayaa sheegay inay rajeynayaan dabcinta kala xirnaanshaha.

[2] Madow / Afrikaan / Kariibiyaan / Madowga Ingiriiska

Tallaabooyinka Xiga

Macnaha guud ee heerka qaran iyo heerka deegaan safmareenka Covid-19 ayaa si xawli ah isku beddelaya. Natiijooyinkaani waxay taagan yihiin waqti muhiim ahintii lagu gudajiray lixdii bilood ee ugu horreyay ee jawaabcelinta Boqortooyada Ingiriiska (UK). Baaxada jawaabcelinta xog-ururinta waxay noqon kartaa mid muujinaysa heerka walaac ay dadka deegaanku ka dareemeen safmareenka Covid-19 iyo rabitaankooda ah in laga taageero adeegyada caafimaad iyo daryeel inta lagu jiro dhibaatada.

Lix iyo tobanka natiijo ee muhiimka ah ee lagu soo bandhigay bilawga warbixintan waxay bixinayaan aragti ku saabsan nidaamka caafimaadka iyo daryeelka si wax looga qabto u diyaargarowga iyo ka jawaabcelinta safmareenada ah ee dhici karo mustaqbalka.

Waxay sidoo kale wax ka qabanayaan qaar ka mid ah soo-jeedinada ku saabsan sida si ka duwan sidii hore iyo si ka sii fiican wax loo qaban karo haddii, ama marka, Camden ay la soo gudboonaato xaalad la mid ah tan dhacday gudaha Maarso 2020. Waxay sidoo kale wax ka qabanaysaa qaar ka mid ah tallaabooyinka xiga ee ficil iyo maalgashi kuwaasoo u oggolaan doonaan dadka ku nool iyo kuwa ka shaqeeya gudaha Camden inay aad ugu adkeystaan caqabadaha caafimaad ee bulshada mustaqbalka.

Tan iyo markii la bilaabay baaritaanka gudaha Abriil 2020, Healthwatch Camden waxay si firfircoon ula wadaageysay natiijooyinka soo ifbaxaya daneeyayaasha kala duwan si ay isku-duwida ka jawaabcelinta Covid-19 si joogto ah ugu sheegto mahadhooyinka degganaha. Tusaale ahaan, waxaan u soo bandhignay natiijooyinka soo ifbaxaya Guddiga Caafimaadka iyo Fayaqabka ee Juun 2020 iyo baaritaanka Golaha Camden ee saamaynta aan dheelitirneyn ee Covid-19 ku yeeshay bulshooyinka BAME. Waxaan sidoo kale daabacnay 16 qoraal bogeed oo si toos ah uga hadlayay ama ku tiirsanaa waxa aan ku maqalnay jawaabcelinada xog-ururinta.

Wixii hadda ka dambeeya, waxaan qorsheyneynaa inaan natiijooyinka warbixintan si ballaaran ula wadaagno Camden, North Central London iyo wixii intaa dhaafsan si ay u yeelato saameyn weyn oo suurtagal ah. Waxaan u qori doonnaa warqad cayiman oo gaar ah daneeye kasta waxaana la wadaagi doonnaa fikrado iyo tallaabooyinka xiga ee la soo jeediyay iyo horumaro.

Gudaha sannadka 2021 waxaan daabici doonnaa ‘Warbixinta Saamaynta’ taasoo soo bandhigi doonta bog hore oo gaar ah waxaana diyaarin doonnaa tilaabooyinka xiga ee la soo jeediyay, oo ay wehliso wargelin u dhiganta oo ku saabsan sida ay warbixintan u dhiirigelisay isbeddelada iyo harumarinada.